

## Maxkamada Sare Ee Somaliland Oo Soo Saartay Natiijada Rasmiga Ah Ee Doorashada Madaxweynaha.

**Hargeysa(Ramaas) July11, 2010** - Maxkamada Sare ee distooriga ah ee Somaliland ayaa maanta soo saartay Natiijada rasmiga ah ee Doorashadii Madaxtooyada ee dalka ka dhacday 26-kii bishii June ee la soo dhaafay. Waxaanay Maxkamadu meel-marisay Go'aankii Komishanka doorashooyinka qaranku ay soo saareen 1-dii bishan July.

Guddoomiyaha Maxkamada Sare, oo akhriyey natiijada doorashada iyo Qodobada uu u cuskanayo wuxuu yidhi

"Maxkamada Sare ee distooriga ah ee Somaliland markay aragtay in sadexda xisbi qaran ee Somaliland UDUB, KULMIYE iyo UCID mid waliba uu helay doorashadii madaxtooyada ee dalka ka dhacday sidan Xisbiga KULMIYE oo helay **266,906** oo u dhiganta **49.59%**, Xisbiga UDUB oo helay **178,881** oo u dhiganta **33.28%**, xisbiga UCID oo helay **92,450** oo u dhiganta **17.23%**. markay Maxkamada Sare hubisay xisaab ahaan dhammaan qoraalada raad raaca asalka ah ee xafiisyada doorashooyinka gobolada iyo Natiijada ku meel gaadhka ah ee ay ku dhawaaqeen Guddida Doorashooyinka qaranku 1/07/2010 markii ay maxkamaddu xaqiijisay inaanu jirin wax dacwad ama cabasho ah oo ku saabsan doorashada madaxtooyada aanay soo gaadhin tobankii maalmood ee ka dambeeyay dhawaaqii natiijadii ku meel gaadhka ahayd."

"Markii ay u cadaatay Maxkamada hawl galada Guddida doorashooyinka qaranku qaaday dhamaan ay waafaqsan yihiin qodobada distooriga Somaliland oo kala ah 80,81, 82 iyo 83 iyo Qodobada xeerka No:17/2000 ee xeerka aasaaska Axaabta qaranka eek ala ah Qodobka 1-aad fiqrada 5-aad iyo Qodobka 2-aad, Qodobka 7-aad fiqrada 2-aad, Qodobka 7-aad fiqrada koowaad iyo fiqrada 2-aad. Sidaasi darteed Maxkamadu waxay soo saartay qaraarkan waxay ansixiysay Natiijada ku meel gaadhka ah ee Guddida doorashooyinka qaranka,"

Ayuu yidhi Md. Maxamed Ismaaciil Xirsi (Oomane).

Guddoomiyaha Maxkamada Sare wuxuu ku dhawaaqay inay sharci tahay in xisbiga KULMIYE ku guulaystay doorashadii Madaxtooyada ee

dalka ka qabsoontay 26-kii Bishii June ee la soo dhaafay, isla markaana Murashaxiintiisu ku guulaysteen xilalka kala ah Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka Somaliland, waxaanu yidhi "Waxa jagada madaxweynaha Somaliland ku guulaystay Musharaxa koowaad ee Madaxweynaha ee xisbiga KULMIYE Md. **Axmed Maxamed Maxamuud Aadan** uu ku guulaystay Madaxweynaha Somaliland, Murashaxa labaad Md. **C/raxmaan Cabdilaahi Ismaaciil Shire** uu isna ku guulaystay Jagada Madaxweyne Ku Xigeenka Somaliland. mudada xilka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka cusub waa shan sano oo ka bilaabanta maalinta xilka loo dhaariyo. Madasha dhaarta Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka cusub waxay noqonaysaa Xarunta madaxtooyada Somaliland oo ay goob joog ka yihiin Madaxda Goleyaasha xeer dejinta. Mudada Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenkii hore waxa xilkoodu ku afjarmayaa maalinta la dhaariyo Madaxweynaha iyo ku xigeenka cusub."

Ramaasnews Desk

Hargeisa